# SIYAASADA TALEEFANKA GACANTA

## 8332.00. Bayaanka Siyaasada

Gudiga waxbarashada waxa ay aqoonsan yihiin in ujeedooyinka iyo baahiyaha Degmada ay ka mid yihiin in ay si degdeg ah oo hufan ula xiriiraan shaqaalaha Degmada iyo in isticmaalka taleefanka gacanta ama qalab isgaarsiineed oo la mid ah oo noqon karo mid hufan oo wax ku ool ah, iyo laga yaabo in loo baahdo ama muhiim u yahay xaaladaha qaarkood. Iyadoo la raacaayo waajibaadka Gudiga si loo hubiyo in hantida Degmada lagu bixiyo oo kaliya baahida Degmada ee sharciga ah, waa siyaasada Gudiga in Degmada ay siiso qalabkaan oo kale kharashka Degmada shaqaalaha marka Kormeeraha Guud ama wakiilkooda xukumaayaan, isticmaalka taleefanka gacanta ayaa loo baahan yahay si shaqaalaha u guto waajibaadka loo xilsaaray; marka isgaarsiinta loo maro habab kale, kharash yar, ay tahay mid aan tayo lahayn, aan la heli karin ama aan la hirgilin karin. Waa siyaasada Gudiga Waxbarashada, marka lagu daro, in looga baahan yahay Kormeeraha Guud ama cida ay u xilsaaran tahay inay hormariyaan iyo hirgeliyaan habraacyadaan oo u adeegi doono si ku filan oo sax ah u bixinta qalabyada iyo xakamaynta kharashka; iyo in la hormariyo iyo la dhaqan geliyo heerarka ku haboon isticmaalka taleefanka gacanta ee Degmada iyo qalabka la xiriiro.

## 8332.10. Qeexitaano

1. "Teleefanka gacanta" ujeedooyinka siyaasadaan macnaheeda waa taleefan kasto oo gacanta ah, walkie-talkie, ama isgaarsiin kale ama qalab shaqo badan (oo ay ku jiraan, tusaale ahaan oo aan ku xadidnayn, sida taleefanka casriga ah ama qalab la mid ah) iyo qalabyada la xiriiro, oo ay ku jiraan bedelayaasha korontada; jaarjarada; kaararka gelitaanka balaaran iyo aaladaha MiFi ee kombayutarada gaarka ah ama laptop yada; iyo qalabyada wax lagu kaydiyo, kuwaas oo adeega iibka lagu bixiyo iyo ay bixiso Degmada.

2. "Shaqeynta taleefanka gacanta" macnaheeda waa in awood kasto laga heli karo taleefanka gacanta oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidnayn, fariimaha codka, fariimaha qoraalka ah, kaamarada, fariimaha sawirka, muuqaalka, fiidiyowga, internetka, ciyaaraha, dhawaaqyada wicitaanka iyo waxyaabo kale sida " soo dejinta."

3. "Adeegyada" ujeedooyinka siyaasadaan macnaheeda waa alaabyada oo bixiyo iibiyaha, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidnayn: gelitaanka/isticmaalka, codka, dhex wareegyada, fariimaha, internetka, iyo/ama qalab lagu daray, kireeyay ama la soo iibiyay iyada oo qayb ka ah qandaraaska iibiyaha kula jiro Degmada.

4. "Iibiye" ujeedooyinka siyaasadaan macnaheeda waa in alaab qeybiye kasto oo siiyaa taleefanada gacanta, shaqeynta taleefanka gacanta ama adeegyada taleefanka gacanta ee Degmada.

## 8332.20. Isticmaalka Taleefanka Gacanta Ee La Ogol Yahay

1. Liiska magacyada shaqada oo u baahan taleefanada gacanta ee Degmada leedahay waa in lagu hayaa Xafiiska Ganacsiga (IM&T) iyo waxaa lagu qeexaa Xeerka Degmada 8332-R.

2. Taleefanada gacanta ee ay bixiso Degmada sida waafaqsan siyaasadaan waa in loo isticmaalo ganacsiga rasmiga ah ee Degmada oo keliya. Lama ogolo isticmaalka shaqsi ahaaneed ee taleefanka gacanta ee Degmada, marka laga reebo si lama filaan ah iyo lama huraan ah. Isticmaalka shaqsi ahaaneed waa in lagu xisaabiyaa iyo oo bixiyaa shaqaalaha hadii ay ku dheliso qarash dheeraad ah Degmada.

3. Taleefanada gacanta iyo hawlaha taleefanka gacanta waa in loo isticmaalo oo keliya si waafaqsan siyaasadaha Degmada iyo/ama xeerarka kale, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xadidnayn, siyaasadaha Gudiga ee soo socdo: Xeerka Anshaxa (siyaasada 1400), Isticmaalka La Aqbali karo ee Isku Xirka Degmada (siyaasada 1950) , Xeerka Anshaxa (siyaasada 2160), iyo Internetka (siyaasada 4526).

4. Kaamarada taleefanada gacanta maloo isticmaali karo ujeedooyin shaqsi ahaaneed ama xadgudub ku ah siyaasadaha Degmada ama ku xadgudbida sharci kasto oo maxali, gobol ama federaal ah.

**8332.30. <u>Ma Jirto Wax Qarsoodi ah oo Laga Filaayo: La Socodka Isticmaalka Taleefanka Gacanta</u>**

Shaqaalaha isticmaalo qalabka Degmada, oo ay ku jiraan taleefanada gacanta ma yeelan doonaan wax rajo qarsoodi ah oo ku saabsan isticmaalka nooc, xitaa marka loo eego isticmaalka shaqsi ahaaneed. Isticmaalka taleefanka gacanta/isgaarsiinta waa la kormeeri karaa iyo la qori karaa ama la duubi karaa, si kasto oo aan sharciga mamnuucin, ee Degmada waqti kasto.

**8332.40. <u>Ciqaabta Isticmaalka si Qaldan</u>**

Ku xad gudbida siyaasadaan, iyo xeerar kasto oo lagu soo bandhigo iyada, waxay keeni kartaa in lagala noqdo teleefanada gacanta, talaabo anshaxeed oo waafaqsan heshiisyada gorgortanka wadareed ee quseeyo ama, halka ay ku haboon tahay Xeerarka iyo Nidaamyada, iyo, hadii ay haboon tahay, u gudbinta sharci fulinta. Dhamaan diiwaanada la xiriiro isticmaalka kharashka qalabkaan waa in loo ogolaadaa Degmada dacwad kasto oo anshaxeed iyo waxaa lala wadaagi karaa saraakiisha fulinta sharciga.

**8332.50. <u>Soo Saarista Xeerarka</u>**

Mas'uuliyada hormarinta, daabacaada iyo fulinta xeerarka si loo hirgeliyo siyaasadaan waxay saaran tahay Kormeeraha Guud ee Dugsiyada, sida ay ogol yihiin Gudiga Waxbarashada Siyaasada 3310, Hormarinta Xeerarka. Xeerarka noocaan ah waa inay u hogaansamaan dhamaan sharciyada federaalka ama gobolka ee quseeyo. Kormeeraha Guud ee Dugsiyada, oo leh talada iyo waanada Waaxda Sharciga ee Degmada, ayaa si cad loogu ogolaaday inoo diyaariyo, cusboonaysiiyo, ilaaliyo iyo hirgeliyo xeerarka maamulka. Xeerarka noocaan ah waa in ay tixraacaan siyaasadaan, iyo waa in lagu daabacaa si macquul ah oo loogu talagalay in lagu xaqiijiyo gelitaanka, sida ku darida Buuga Siyaasada Gudiga ee boga Degmada.

| | |
|---|---|
| Tixraac aan Toos aheyn: | Xeerka Anshaxa (1400)<br>Isticmaalka La Aqbali Karo ee Xiriirka Degmada (1950)<br>Xeerka Anshaxa (2160)<br>Internetka (4526)<br>Hormarinta Xeerarka (3310)<br>Xeerka Isgaarsiinta Mobilka (8332-R) |
| Tixraac: | Wax ka Bedelka Afaraad, Dastuurka Maraykanka<br>Wax ka Bedelka Afar iyo tobnaad, Dastuurka Maraykanka<br>*Magaalada Ontario, California v. Quon* 130 S. Ct. 2619 (2010) |
| Xasuus qoraal: | La ansixiyay Agoosto 16, 2007 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2007-08: 153; Wax laga bedelay Maarso 23, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 555 |

ct/sg